

## **Kaadi uruurin 24-saac ah oo loogu tala galay cabbiritaanka potassium, magnesium ama phosphate**

### **Vuorokausivirtsan keräys kalsium-, magnesium- tai fosfaattimääritystä varten**

Si tijaabadu u noqoto mid lagu guuleysto, waxaa muhiim ah inaad wax u cunto oo aad wax u cabto si caadi ah in si kale yeel lagu dhaho maahee. Waa in la uruursho dhammaan kaadida la dhigo 24 saacadood. Raacitaanka tilmaameyaashaan waxaad ku heleysaa natiijoyinka ugu macquulsan ee la isku hallayn karo. Hadii aad ka weecatay tilmaamaha, fadlan u sheeg qofka kaa qaadaya kasbada.

### **Qalabka uruurinta**

Shaqaalaha shaybaarka ayaa ku siin doona hal (ama labo) weel oo aad ku soo shubto iyo 2 x 5 ml 6 M hydrochloric acid ah taasoo loo isticmaalayo sidii wax wax lagu keydsho oo kale oo hallaabida ka ilaalisa. Hydrochloric acid waa sun iyo wax sidoo kale jirka googoyn kara, marka waa inaad ka taxadarto in aad indhahaaga gaarsiiso ama maqaarkaaga ama dharkaaga. Fadlan waxyaabaha wax lagu keydsho si aysan u hallaabin ka dheeree meelaha carruurta ay gaari karaan. Xasuusin. "Waa in tillaabo dagdag ah la qaado hadii shil uu dhaco"

### **Uruurinta kaadida**

Mari kaadi haystaada adoo jooga musqusha waqti kuu habboon, sida 7:15. **KAADIDAAN LAMA URUURINAAYO**, laakiin qor waqtiga, maadaama uu calaamadeyn u yahay bilowga uruurinta. Bilow uruurinta (kaadi haysta waa la mariyay):

Taariikh \_\_\_\_\_ Waqtiga \_\_\_\_\_

**URUURINTU WAQTIGAAN AYAY KA BILAABATAA.** Uruuri kaadida aad dhigayso muddada xigta ee ah 24ka saac kuna shub weelka uruurinta. Waa inaad ka taxadarto inaysan kaa lumin wixii kaadi ah oo aad dhigayso marka aad saxaroonayso. Wax saxaro ama xaashi ah waa in aysan galin weelka kaadida lagu uruurinaayo.

Markii qeybta ugu horeysa ee kaadida aad uruuriso, ku shub 5 ml oo ah waxa lagu kaydiyo si aysan u hallaabin weelka kaadida lagu uruurinaayo. Ku dar 5ta ml ee soo hartay dhammaadka uruurinta. Hadii kaadi aad u yar bas ah ay kaa timaado (taasoo ka yar 1 dl) inta uruurintu socoto, haku darin qeybta labaad ee ah waxa lagu keydsho si aysan u hallaabin. Hadii aad buuxiso weelka ugu horeeya, ku dar 5ta ml ee labaad ee waxa lagu kaydsho ah weelka labaad gudahiisa kadib qeybta ugu horeysa ee kaadida.

Ilaa inta aad kaga celinayso shaybaarka, ku astur weelasha kaadida aad ku uruurisay meel u qabow (sida firinjiyeer) oo mugdi ah ayaga oo weelasha ay daboolan yihiin. Weelasha waxa aad kusoo shubtay ee kaadida ah waa in aysan dhagin.

Mari kaadi haystaada adigoo kaadida ku hoorinaya weelka kaadi uruurinta marka ugu dambaysa isla markii ay dhammaadaan 24 saac laga soo bilaabo markii aad bilowday kaadi uruurinta. Qor waqtiga.

Taariikh \_\_\_\_\_ Waqtiga \_\_\_\_\_

## **Kaadi uruurinta ka dib**

**Si loo garto kasbada, waxaa aad muhiim u ah** inaad ku dhajiso weelka dushiisa calaamad muujinaysa **magacaaga, nambar lagugu aqoonsado iyo waqtigii aad bilowday kaadi uruurinta iyo waqtigii aad dhammaysay.** Shaybaarku ma baari karo kasbooyin si fiican aan u calaamadaysnayn. Fadlan u keen kasbadaada shaybaarka sida ugu dhaqso badan ee macquulka ah.

Hadii aad hayso wax suaalo ah, fadlan soo wac nambarka adeega ee HUS, tel. +358 9 471 86800 Isniin–Jimce 7:30–15:30 (natiijada shaybaarku helo taleefan laguma soo gudbin doono).